

Ruqsad Bixinta Seattle

— qayb ka mid ah taxanaha qaybaha badan ee Waaxyaha adeegyada iyo ruqsad bixinta ee Magaalada

Helitaanka Ruqsad

La cusboonaysiiyay Janaayo 2024

Ma u baahanahay Ruqsad?

Hawlaha iyo shaqooyinka qaarkood, oo ay ku jiraan kaydinta iyo/ama isticmaalka walxaha halista ah, waxay u baahan yihiin ruqsad Seattle Fire Department marka hawlahaas iyo shaqooyinkaas lagu qabto Seattle.

Noocyada Ruqsada

Ruqsadaha ku meel-gaarka ah ayaa la bixiya shaqooyin iyo hawlo kala duwan oo la qabto mudo gaaban. Kuwaas waxaa kamid noqon kara hawlaha ay ka mid yihiin dhisidda teendhooyin iyo hoos, iibinta cuntada, carwooyinka iyo ciidaha, bandhigyada ganacsiga iyo bandhigyada, riwaayadaha, shaqada kulul ee maraakiibta badda. Ruqsadaha saqafka iyo hawlaha goobta dhismaha waxaa la bixiyaa muddo aan ka badnayn lix bilood.

Ruqsadaha hawlgalka ee sannadlaha ah ayaa la bixiyaa goobaha lagu kulmo (Kaniisadaha, makhaayadaha, goobaha munaasabadaha lagu qabto) iyo shaqooyinka ama hawlaha khatar ah oo si joogto ah loogu qabto goob go'an ama goobo kala duwan ee magaalada dhan.

Si aad u ogaato inaad ruqsad uga baahan tahay SFD, booqo liiska hawlaha/alaabta u baahan ruqsad: <https://www.seattle.gov/Documents/Departments/Fire/Business/ActivitiesRequiringaSFDPPermit.pdf>.

Maxaan u Baahanahay si aan u Codsado Ruqsad?

Waxaad u baahan doontaa macluumaadka ku saabsan shaqadaada, hawlahaaga ama alaabtaada oo ay ku jiraan, haddii ay khuseyso, khariidadaha goobta ama qorshayaasha.

Qeyb kamid ah ruqsada walxaha khatarta ah waxaa laga yaabaa inaad u baahato inaad bixiso Bayaanka Liistada Keydinya Alaabada Khatarta ah (HMIS) wadarta tirada, ku badnaanshaha, walaxaha halista ah iyo lambarka Chemical Abstract Service (CAS). Kasoo dejiso foomka HMIS iyo hagitaanka adeegsada barta:

<http://www.seattle.gov/fire/business-services/>

[permits#hazardousmaterial](#).

Sidee ayaan u Codsadaa Ruqsad?

Lacagaha waa in la bixiyaa wakhtiga codsiga. [Soo dejiso foomamka codsiga](#) oo iimayl ugu dir permits@seattle.gov kadib ku bixi [kaarka bangiga khadka tooska ah](#). Ama boostada ugu soo dir codsiyada dhamaystiran oo ay la socdaan jeegaga lagu bixiyay lacagta "City of Seattle" adoo u diraysa:

Seattle Fire Department
Fire Prevention Division - Permits
220 Third Avenue South, 2nd Floor
Seattle, WA 98104-2608

Sidee ayaan U Qabsadaa Balanta Baaritaan?

Ruqsadaha ku meel-gaarka ah ee hawlaha khatarta ah ama kaydinta iyo isticmaalka walxaha khatarta ah waxay u baahan yihiin kormeer SFD kahor inta aanad bilaabin shaqada ruqsadeeda la bixiyay. Tusaale ahaan, alxanka iyo shaqada kulul ee lagu dul sameeyo doonyaha waxay u baahan yihiin kormeeritaan kahor inta aadan bilaabin shaqada la ruqsadeeyay. Haddii ay khusayso, foomka codsiga ruqsada ayaa ku faraya inaad codsato kormeer kahor inta aanad bilaabin shaqada. Fadlan nala soo xiriir ugu yaraan hal maalin shaqo kahor si aad u ballansato kormeerka—iimayl noogu soo dir permits@seattle.gov ama naga soo wac (206) 386-1450, Isniinta ilaa Jimcaha, 8 subaxnimo ilaa 4:30 galabnimo.

Dhammaan ruqsadaha kale, uma baahnid inaad wacdo SFD si aad u dejiso kormeerka —midan waxaa kamid ah ruqsadaha sanadlaha ah ee agabka/hawlaha khatarta leh, ruqsadaha goobaha munaasabadaha gaarka ah, iyo ruqsadaha sanadlaha goobaha kulank. badelkii, Kormeerayaashayada ayaa kula soo xiriiri doona si ay kuugu diyaariyaan waqti aan kula kulano goobta, ama waxaan sameyn karnaa kormeer aan la ogeysiin kahor bixinta ogolaanshaha ama ka dib marka ogolaanshaha la bixiyo si aan u hubinno inaad tahay buuxinta shuruudaha ruqsada.

www.seattle.gov/fire

Fire Prevention Division
220 3rd Avenue South

Seattle.gov/fire/business-services/email-fire-prevention



City of Seattle
Fire Department

Ruqsadaha wakhtiga xasaasiga ah (sida dhacdooyinka gaarka ah ee dhacaya mustaqbalka dhow ama ku dhajinta ruqsada mashruuca dhismaha) ayaa la siiyaa mudnaan iyo codsiyada kale ee oggolaanshaha sida caadiga ah waxaa loo eegaa sida ay u kala horeeyaan.

Kadib markaad gudbis codsigaga iyo lacag bixinta, waxaanu ku siin doonaa rasiid. Haddii aad codsatay oggolaanshaha sannadlaha ah, waa inaad ku dhejisaa rasiidhka goobta shaqada ilaa kormeerka la samaynayo oo aan ku siinay ruqsad. Marka aad hesho ruqsad. Marka aad hesho ruqsad, fadlan soo dejiso rasiidka oo ku dheji ruqsada iyo shuruudaha. Qofka mas'uulka ka ah ruqsada ayaa looga baahan yahay inuu hubiyo in shuruudaha ruqsada la raacay.

Sidee ayaan ugu Diyaar garoobi karaa Kormeerka?

Kahor inta aysan SFD samayn kormeer, dhammaan aalada loo baahan yahay waa in la diyaariyo goobta shaqadana waxay u baahan tahay inay diyaar u ahaato shaqada. Kahor inta aan la bixin oggolaanshaha, kormeeraha SFD ayaa sameyn doona bubin doona in dhammaan shuruudaha ruqsada lagu buuxiyey goobta oo go'aamin doonaa haddii shuruudo dheeraad ah ama shuruudo gaar ah loo baahan yahay.

Dhamaan xaaladaha, waxaa lagugu soo wargelin doonaa qoraal ahaan sixitaanka kasta oo laga yaabo inuu muhiim yahay kahor inta aan la ogolaanin ruqsada la bixin karo.

Goorma ayaan Heli doonaa Ruqsadayda?

Ruqsadaha ku meel-gaarka ah waa la saxeexi doonaa oo lagu siin doonaa wakhtiga kormeerka. ruqsada sannadlaha ah ayaa la hawlgalin doonaa, la diwaangalin doonaa oo boosta kuugu soo diri doonaan Shaqaalaha Qaybta Ruqsada.

Heerka ay marayso ruqsada ama codsiga ayaa laga eegi karaa [khadka tooska ah](#).

Su'aalaha Inta Badan La Isweydiiyo

Fadlan dib u eeg khadka tooska ah kaydka yaga Su'aalaha Inta badan isweydiiyaan macaamiisheena: <http://www.seattle.gov/fire/business-services/permits>. Waxaad sidoo kale iimayl noiogu soo diri kartaa permits@seattle.gov.

Haddii aad wali qabto su'aalo ku saabsan habraaca baaritaanka ruqsad, waxaad iimayl u diri kartaa Waaxda Khatarta Gaarka ah SFD_FMO_SpecialHazards@seattle.gov or the Special Events Section at SFD_FMO_SpecialEvents@seattle.gov.